



the women's
the royal women's hospital
victoria australia

MARKA LA WACO ISBITAALKA

TALADA DUMARKA KU JIRA BILAHA UGU DAMBEEYA EE UURKA

Marmarka qaarkood bilaha ugu dambeeya ee uurka, isbedelo ayaa laga yaabaa inay dhacaan kuwaas oo welwel geliya dumarka. qaar badan oo ka mid ah welweladaas waxaa lagaga hadli karaa ballantaada rugta caafimaadka, si kasta ahaatee qaar ayaa waxaa kaala hadli doonta umulisadaada sida ugu dhaqsa badan.

Goorma ayaan wacayaa isbitaalka?

Waxaa waajiba inaad la xiriirto isbitaalka haddii aad isku aragto mid ka ah astaamaha soo socda:

- haddii biyuhu kaa dilaacaan (tani waxay dhici kartaa ka hor ama ka dib marka qabqabashadu bilaabato).
- Haddii siilka dhiig kaa socdo kaas oo aanay ku qasnayn dheecaan. Dhiig ka socda siilka oo leh dheecaan aad siyaado u ah oo loogu yeero 'tusaale' waana calaamad muujinaysa in fooshu ay caadi u socoto. Waxaad awoodaa oo kale inaad yeellato 'tusaale' haddii baaritaan lagugu sameeyey markii isbitaalka lagu dhigayey.
- Haddii qabqabashadu tahay joogto, ayna qaadatao 30 ilmiriqsi kuna dhowdahay in ka badan 5 daqiiqo intay isu jirto.
- Haddii aad ka cabsi qabto ama aadan hubin wixii la xiriira wixii dhacaya
- Haddii aad u baahan tahay maaraynta xanuunka.
- Haddii aadan dareemin in ilmahaagu dhaqaaqayo.

Yaan wacayaa?

Si aad ugala hadasho umulisada joogta isbitaalka haddii aad qabto welwelkan, waa inaad wacdaa

- **(03) 8345 3635 (Parkville patients)**

Ha u soo wicin lambarkaan wixii macluumaad guud ku saabsan.

Fool miyaa I haysa?

Maaha wax qariib ah in dumarka qaarkood la dhigo isbitaalka hal mar ka badan inta aysan fooshu aad u bilaaban, khaasatan ilmaha ugu horreeya.

Mararka qaarkod fooshu markay bilowga tahay waxaa loogu yeeraa wajiga foosha ka horreeya ama fool jajabow. Haddii ay tahay markii kuugu horreysay ee aad dhalaysid, fool jajabowgu waxay qaadataa dhowr saacadood, maalmood ama usbuucyo.

Xanuunka foosha ee aan isdaba joogga ahayn ee aad dareemaysid ayaa ilma galeenka afkiisa jilcinaaya oo khafiif ka dhigaaya, si uu ugu diyaar noqdo inuu sii furmo. Dumarka badankood waxay dareemaan xanuun qaqabasho ah oo u dhigma xanuunka caadada.





Markee ayaan isbitaalka imaan karaa?

Cilmi baaris ayaa waxa lagu ogaaday in dumarka fiyow, oo sedkoodu buuxsamay iyo cunuggaba ay xilligaan hore guriga joogaan. Wanaagsan, muddo buuxda, taas macneheedu waxa weeye uurkaagu waa ka badan yahay 37 asbuuc adiga iyo ilmahaaguna waa fiyowdhiin.

Haddii lagu siiyey wax macluumaad ah oo ka duwan oo la xiriira xaalladaada khaas ahaaneed, fadlan raac macluumaadkaan mucayinka ah.

Guriga, waxaad haysataa xoriyada agagaarahaaga. Waad cuni kartaa, seexan kartaa oo ku warwareegi kartaa agagarahaaga.

Dhegayso jirkaaga samayna waxaad u aragto inay sax tahay. Xasuuso in khibradaadu ay tahay mid aad adigu leedahay

HEERKA/MUSTAWAHA FOOSHA	DAREENKA	WAXA DHACAYA	FIKRADAHA KU CAAWIMAYA
<p>Foosha ka hor</p> <p>Afka ilma galeenka oo bilaabay inuu soo yaraado</p> <p>Qaqabasho aan joogto ahayn, qaqabasho gaaban</p> <p>Waxaa laga yaabaa inuu ku dhamaado maalmo yar</p>	<p>Farxad, welwelsan</p> 	<p>Dheecaan uu ku qasan yahay dhiig</p> <p>Dhabar xanuun</p> <p>Xanuun qaarka hoose ee jirka (sida xanuunka caadada)</p> <p>Marmarka qaarkood shuban</p> <p>Marmarka qaarkood biyaha ayaa dilaaca</p> <p>Waxaa laga yaabaa inaad dareento daal.</p>	<p>Nolosha wax caadi ah</p> <p>Warwareeg, is mashquulli</p> <p>Naso haddii aad u baahan tahay</p>
<p>Heerka 1aad: qaybta hore (8-16 saacadood)</p> <p>Afka ilmagaleenka 0-14cm ayuu debcay (furan)</p> <p>Qabqabashadu waa joogto, 5 – 20 kala durugsan, ku dhamaanaya 20-40 ilmiriqsi</p>	<p>Farxad, welwelsan</p> 	<p>Waxaa laga yaabaa inaad dareento daal.</p> <p>Dheecaan uu ku qasan yahay dhiig</p> <p>Dhabar xanuun</p> <p>Xanuun qaarka hoose ee jirka (sida xanuunka caadada)</p> <p>Marmarka qaarkood shuban</p> <p>Marmarka qaarkood biyaha ayaa dilaaca</p>	<p>Sii wad cunida iyo cabida (marmarka qaarkood wax aad u yar)</p> <p>Warwareeg, is mashquulli</p> <p>Naso haddii aad u baahan tahay</p> <p>Faaruuqi kaadi haysta labadii saacadoodba hal mar</p> <p>Xisaabi qabqabashadaada (bilaabida mid iyo bilaabida mid kaleeto)</p> <p>Wac isbitaalka</p>
<p>Heerka 1aad: marxalad kacsan (3-5 saacadood)</p> <p>Afka ilma-galeenka 4-8 furan</p> <p>Qabqabashadu 3-7 daqiiqo ayay kala durugsan tahay, soconaysa 50-60 ilmiriqsi</p>	<p>Wuxuu noqonayaa mid daalan, aan xasiloonayn</p> 	<p>Qaqabasho, xoogan iyo mid joogto ah</p> <p>Xoogan, xanuun qaarka hoose ah</p> <p>Dhabar xanuun ayaa laga yaabaa inuu sii socdo.</p> <p>Gebi ahaanba diirada saaraysa fool</p> <p>Ku tiirsan kaalmada dadka</p> <p>Dheecaan dhiig ku qasan</p> <p>Biyaha ayaa laga yaabaa inay dilaacaan</p>	<p>neefneefso</p> <p>Diirada saar</p> <p>Qaado biya kulul ama isticmaal boorsooyin kulul</p> <p>Bedel sidaad u fadhido</p> <p>Naso inta u dhexaysa qabqabashada</p> <p>Kabo biyaha/nuug macmacaan</p>
<p>Heerka 2aad: soo riix (1/2-2 saacadood)</p> <p>Afka ilmagaleenka si buuxda ayuu u debcay (10 daqiiqo)</p> <p>Qabqabashada 2-5 daqiiqo kala durugsan, kuna dhamaanaya 60-90 ilmiriqsi</p>	<p>Xoog u shaqaynta</p> 	<p>Qabqabasho aan kala go' lahayn</p> <p>Xanuunku waa soo yaraanayaa, cadaadis siyaada ah</p> <p>Rabitaan xoogan oo riixida ah</p> <p>Is kala bixin, gubasho marka ilmaha madaxiisu hoos u soo dego</p>	<p>Riix markay qabqabashadu socoto (isticmaal muraayad)</p> <p>Naso inta u dhexaysa qabqabashada</p> <p>Barkin qabow ama iska buufi wajiga iyo qoorta</p> <p>Dhegayso dadka ku caawimaya</p> <p>Waxaa laga yaabaa inaad leedahay rabitaan xoogan oo riixid ah si aad hoos ugu dhigto soo bixida madaxa ilmahaaga</p>

AFFEEFTE Xaashidaan xaqiiqada waxay bixisaa macluumaad guud keliya Tala mucayina oo ku saabsan ilmahaaga ama baahida daryeelka caafimaad, waa inaad raadisaa talada aqoonyahanada caafimaadka Isbitaalka Royal Women's Hospital ma aqbal wax masuuliyad ah oo lumitaan ama khasaaro ah oo ka timaada ku tashiga xaashidaan halkii aad ka arki lahayd aqoonyahan caa imaad. Haddii ilmahaaga yari u baahan yahay ka warhayn caa imaad oo degdeg ah la xiriir qaybta xaalladaha degdegta ah ee kuugu dhow.
© The Royal Women's Hospital 2017-2019